

HELIDA DIYAARA: DHAMMAAN KU SAABSAN DUGSIGA SARE

Dugsiga sare waa wakhtiga la dhisayo xirfadahaaga oo la sahaminayo xiisahaaga si aad ugu diyaar garowdo nolosha ka dambaysa dugsiga sare. Si aad halkaas uga qalanjebiso waxaa jira shuruudo aad buuxinayso oo aad ayay muhiim u tahay in la garto iyaga.

MAXAAN U BAAHANAHAY INAAD SAMEEYO SI AAN UGA QALAN JEBIYO DUGSIGA SARE?





Shaqayso qadarinta loo baahanyahay – ardayda Gobolka Washington waa inay dhammaysiraan **ugu yaraan 24 buundo oo qadarin ah** si looga qalanjebiyo dugsiga sare ee Fasalka 2019 iyo wixii ka dambeeya. Si kastaba ha ahaatee, dugsigaaga sare waxa uu yeelan karaa shuruudo qadarin yar oo ka duwan. Waa inaad sidaa qadar gaar ah oo buundo ah maadooyinka gaarka ah, sida afar buundo oo Ingiriisi ah.

Fasal kasta oo aad qaadatao dugsiga sare waxa uu kuu dhoweeyaa qalan jebinta. La hadal la taliyahaaga si aad liis uga hesho shuruudaha dugsigaaga ah.

Buuxi heerka qiimaynaha gobolka – Waa inaad qaadataa oo gudubtaa **qiimaynta gobolka** fanka luqadda ingiriisiga, xisaabta iyo sanyinka ama qaado oo buuxi heerka beddelaadaha kala duwan.

Dhammaystir Dugsigaaga Sare iyo Qorshaha Ka dambeeya – Ka bilaabmaysa fasalka 7aad ama 8aad waxaad samayn doontaa qorshe lagu caawiyo inaad ka fekerto mustaqbalkaaga oo u doorato fasalada kuu diyaariya adiga hadafyada ka dambeeya dugsiga sare.

TILMAAMAHA:

-  Waxa aad ka samayso dugsiga sare waxa uu saamayn karaa mustaqbalkaaga
-  Dareenka u soo jeedi fasalka oo raad raac buundooyinkaaga
-  Isticmaal qorsheeye si aad u baabusho oo qor laylisyada, taariikhda la filayo iyo masuuliyadaha kale
-  Ha ka baqin inaad caawimo waydiisato. Naftaada u dood oo waydiiso taageero lataliyaashaada, macalimiinta, xubnaha qoyska iyo barayaasha.

DUGSIYADA QAARKOOD WAXAY LEEYIHIIN SHURUUDO DHEERAAD AH OO QALINJABINTA AH

La tasho la taliyahaaga dugsiga si aad u aragto haddii wax shuruuda ah oo kale ay jiraan oo lagu shaqaysto **dibloomadaada**.

Celceliska Buunda La ururshay (GPA) – Deeqda Waxbarasho ee Bound College iyo degmooyin kale oo dugsiga ah waxay u baahanyihiin ugu yaraan 2.0 GPA si loo qalanjebiyo. Inta uu sareeyo kaaga **GPA**, inta badan ee kulliyada iyo doorashooyinka deeqda waxbarasho lagu heli karo.

Adeegyada Barashada – Waxaad u baahan kartaa inaad dhammayso saacadaha waxbarashada, halka aad dib ugu celiso kulliyada oo muujiso khibradaada.

SEBTAMBAR: FASALKA 9 iyo 10